

# Weydiimo, ra'yi wadaagis iyo cabashooyin

Weydiintayada, ra'yi wadaagista iyo sharciyada cabashooyinka ayaa sharraxaya sida dadku noola soo xidhiidhi karaan:

- weydiimaha
- ra'yi wadaagista
- cabashooyinka.

Waxaad sharciyada ka heli kartaa boggayaga internetka oo ah [www.ndis.gov.au/contact/feedback-and-complaints](http://www.ndis.gov.au/contact/feedback-and-complaints)

Ma jirto hab khaldan oo aad noola soo xidhiidho, waxaana soo dhawaynaynaa dhammaan weydiimaha, ra'yi wadaagista ama cabashooyinka ku saabsan Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka (National Disability Insurance Scheme - NDIS).

## Ballanqaadkayaga aan adiga kuu ballanqaadeeno waa:

1. Inaan noqon doono kuwo hufan
2. Inaan noqon doono kuwo kuu soo jawaaba
3. Inaan noqon doono kuwo ku xushmeeya
4. Inaan noqon doono kuwo awood ku siiya
5. Inaan noqon doono kuwo isku xiran.

## Sida aan u maamulno weydiimahaaga, ra'yi wadaagistaada iyo cabashooyinkaaga

Talaabada 1aad: Hal maalin gudaheed ayaan kugula soo socodsiiin doonaa inaan helnay suaashaadii, ra'yi wadaagistaadii ama cabashadaadii.

Talaabada 2aad: Markaan helno weydiintaada, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada, waxaan u baahanahay inaan ka shaqeyno sidii aan kuu caawin lahayn. Waxaa laga yaabaa inaan kuu soo jeedino taageero ka baxsan NDIS si ay kuu caawiso.

Tallaabada 3aad: Waxaan kula soo xiriiri doonaa 2 maalmood gudahood si aan kuu ogeysiino sida aan u maareynayno weydiintaada, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada. Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino macluumaad dheeraad ah si ay taasi noo caawiso.

Talaabada 4aad: Xubinka shaqaalaha ee ugu horeeya ee aad la hadasho ayaa isku dayi doona inuu kaa caawiyo su'aalahaaga, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada. Haddii aan u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaan kuu sheegi doonaa waxa aan u baahannahay inaan sameyno iyo cidda xigta ee kula soo xiriiri doonta.

Tallaabada 5aad: Waxaan xaqiijin doonaa inaan kula xiriirno.

Tallaabada 6aad: Waanu kula soo xidhiidhi doonaa marka aanu dhammayno maaraynta su'aalahaaga, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada. Dhibaatooyinka badanaa waxaan kaaga caawin doonaa ugu badan 21 maalmood gudahood. Dhibaatooyinka qaarkood waxay qaadan karaan waqti dheer.

Tallaabada 7aad: Waxaan kuu sheegi karnaa cidda aad la xiriireyso haddii aadan ku faraxsanayn go'aankayaga ama sida aan u maaraynay weydiintaada, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada.

Talaabada 8aad: Kadib markaan dhameyno maaraynta su'aalahaaga, ra'yi wadaagistaada ama cabashadaada. Waxaan u isticmaali doonaa faallo celintaada si aan u wanaajino habka aan wax u qabanno.

## **Sida aad noola soo wadaagi karto fikirkaaga**

Foomka ra'yi wadaagista onlaynka ah: [www.ndis.gov.au/contact/feedback-and-complaints/contact-and-feedback-form](http://www.ndis.gov.au/contact/feedback-and-complaints/contact-and-feedback-form)

limaylka: [enquires@ndis.gov.au](mailto:enquires@ndis.gov.au)

Telefoonka: 1800 800 110

Webchat: [ndis.gov.au](http://ndis.gov.au)

Qoraal noogu soo dir: National Disability Insurance Agency, GPO Box 700, Canberra, ACT

Haddii aad ku hadasho luqad aan Ingiriis ahayn, waxaad wici kartaa:

Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS)

Telefoonka: **131 450**

Haddii uu hadalku ku dhibayo ama aad dhagool tahay, waxaad wici kartaa:

TTY

Telefoonka: **1800 555 677**

Hadalku oo dhageyso (Speak and Listen)

Telefoonka: **1800 555 727**

Adeegga Gudbinta Qaranka (National Relay Service)

Telefoonka: **133 677**

Website: [www.accesshub.gov.au](http://www.accesshub.gov.au)